

## Ogeysiin Muhiim oo ku aadan Ka qayb qaatayaasha Oregon SNAP (Kaararka Cuntada)

**Waxaad dhammaan gargaaradaada Maarso heli doontaa doontaa Jimcaha, Maarso 1, 2019-ka. Dhamaan qoysaska SNAP ee ku nool Oregon waxay gargaaradooda heli doonaan Maarso 1.**

Kani waa isbeddelka jadwalka caadiga ah. Gargaarada sida caadiga ah waxaa la sii daayaa bisha 1-keeda-9-keeda iyada oo ku xiran lambarkaaga Social Security-ga.

Isbeddelkani wuxuu u dhacayaa si looga hortaggo farqi oo dheer u dhexeeya gargaarada Febraayo iyo Maarso. Gargaarada SNAP ee Febraayo waxaa lasoo saaray waqti hore Janaayo 18-keedii iyada sababtu ahayd dowladda federaalka oo xirnayd.

Jadwalka SNAP ee loogu talagalay Febraayo, Maarso, iyo Abriil 2019-ka

Bisha	Taariikhda Gargaarada SNAP La soo saaray
Febraayo	Janaayo 18
Maarso	Maarso 1
Abriil	Abriil 1-9 (taariikhda caadiga ah ee aad hesho gargaarada)

Xafiisyada DHS ee Oregon waxay furan yihiin saacadihii caadiga ahaa. Si aad u ogaato xafiis booqo [www.oregon.gov/dhs](http://www.oregon.gov/dhs)

Haddii aad u baahan tahay cunto, wac 211 (khadka bilaashka ah) ama goobta cuntada ka hel <https://oregonfoodbank.org/findfood>

Dhibaatooyinka? Wac Khadka Gargaarka Dadweynaha ee Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon 1-800-520-5292